Dhammaan adeegyada dowladda iyo bulshada waa inay:

- ku dareensiiyaan in lagu soo dhawaynayo
- xushmad kuula dhaqmaan
- kuula dhaqmaan si la mid ah dadka kale
- la socdaan dhaqamada kala duwan
- kaa caawiyaan inaad fahamto xuquuqdaada.

Waa laguu oggol yahay inaad ka dacwooto adeeg bixiye.

## Ombudsman-ka (Dacwad Baaraha) NSW

Waxaan halkaan u joognaa inaan caawino qofkasta oo ku nool NSW.
Waxaan rabnaa in qof walba loola dhaqmo si cadaalad ah.
Adeeggeennu waa lacag la'aan.

## Nala soo xiriir

**Wac 02 9286 1000**

**Wicitaan bilaash ah 1800 451 524**
oo ka baxsan aagga magaala weynta Sydney - waxaa laga yaabaa in lagugu soo dalaco qarashka mobilada.

**info@ombo.nsw.gov.au**

**National Relay Service (Adeegga gudbinta Qaranka) 133 677**

**Turjubaan**
Tilaabada 1: **Wac TIS 131 450**
Talaabada 2: **Weydii inaad lahadasho Ombudsman-ka NSW - 9286 1000**

**www.ombo.nsw.gov.au**

ISBN: 978-1-925885-73-6

Ombudsman New South Wales

Somali | Soomaali



# Dhibaato ma kaa haysataa adeegga Dawladda NSW ama adeegga bulshada?

# Waxaa laga yaabaa inaad isku dayday inaad sameyso cabasho. Laakiin taas kuma eysan caawin.



## Ma u malaynaysaa in si aan caddaalad ahayn laguula dhaqmay?

### Waxaad isku dayday inaad caawimaad hesho, laakiin waad kari weyday:

- Inaad xalliso dhibaatada
- hel macluumaad dheeraad ah
- wax ka ogow xuquuqdaada.

### Shaqaaluhu waxtar ma lahayn, ama iyaguba

- waxay ahaayeen kuwo edeb daran oo aan ku ixtiraamin
- Ma aysan haynin macluumaad ku qoran luuqadaada
- ma lahayn turjubaan.

## Ombudsman-ka (Dacwad Baaraha) NSW ayaa ku caawin kara.

### Waan kaa caawin karnaa:

- inaan warqad u dirno adeeg bixiyaha
- heshid qofka saxda ah ee lala xiriiri karo
- sheegno natiijada aad ka rabto cabashadaada.

### Waxaa laga yaabaa inaan:

- kaa codsano inaad keento wixii waraaqo ah ee aad ka hayso dhibaatada, sida waraaqaha aad u qortay adeeg bixiyaha ama waraaqaha uu adeeg-bixiyuhu kuu soo qoray
- la hadal adeeg bixiyaha aad dhibaatada ku qabtid
- la hadal dadka kale ee ku caawiyey.

Dadka kale waxaa laga yaabaa inay qabaan dhibaato la mid ah taada. Waxaan la shaqeynaa adeeg bixiyeyaasha  adeegyada loogu wanaajiyo qof walba.